# LA XISAABTANKA DADKA AY DHIBAATADU SAAMEYSEY

RMU waa qayb madaxbannaan oo ka tirsan Ergada Soomaaliya, kaas oo ujeedadiisu tahay xaqiijinta isla xisaabtanka iyo ku dadaalnaanta habboon ee adeegsiga kheyraadka ICRC-da. Marka ay tahay barnaamijyada gargaarka, xaqiijinta ay RMU sameyso ka hor iyo ka dib bixinta gargaarka waxay hal dhinac ka caawinaysaa ogaashada iyo ka hortagga weecinta gargaarka, qorsheynta iyo hirgelinta oo tayadoodu hooseyso, waxay kale xaqiijintaas door muhiim ah ka ciyaaraysaa sidii looga fogaan lahaa saamaynta xun ee hawlaha gargaarka ay ku yeelanayso ka-faa'ideystayaasha ama bulshooyinka. Iyada oo loo maraayo la taliyeyaal madaxbannaan, xarun wicitaan, khad jawaab-celin iyo cabasho ayaa RMU waxay kor joogteyn ku sameysaa hawlaha waqtigaas socda. Ka qaybgalka ka-faa'ideystayaasha intii uu barnaamijka socdo wuxuu u oggolaanaya in ay ka warqabaan xuquuqdooda iyo waxay xaq u leeyihiin waqti goor hore ah taas oo u adeegsan karaan inay la xisaabtamaan ICRCda markii waxyaabihii ay filanaayeen aan la fulin. Habka jawaab-celinta iyo cabashooyinka oo hay'adda dhexdeeda loo yaqaan Xarunta Xiriirka Bulshada (CCC) waxay shakhsiyaadka iyo bulshooyinka siisaa qaab ay ku bixiyaan jawaab-celin, u gudbiyaan cabashooyinka ama codsashada macluumaadka la xiriira hawlaha ICRC ka wado degaanadooda. ICRC waxaa si toos ah loogala xiriir karaa lambarka gaaban ee lacag la'aanta ah oo laga heli karo shabkad kasta oo telefoonka gacanta ah oo Soomaaliya ku taal.



Erick Chege/ICRC

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

Nagala soo xiriir lambarkeena lacag la'aanta ah **(373)** wixii macluumaad ah, jawaab-celin ama cabashooyin la xiriira hawlaha ICRC ka wado Soomaaliya


**ICRC Somali Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226-00200
Nairobi-Kenya
Tel. + 254 20 2719 301
somalia@icrc.org

**ICRC Mogadishu sub-delegation**
Wadjir District, Buulo Hubey Quarters
P.O. BOX 700
Mogadishu, Somalia
Email: mog_mogadiscio@icrc.org

**ICRC Garowe sub-delegation**
Halgn/zone A
House No. 0185
Jimaale Road
Garowe, Puntland-State
Somalia
Email: gar_garowe@icrc.org

**ICRC Baidoa sub-delegation**
Behind Somaphone tower
Mogadishu - Baidoa road
Email: bad_baidoa@icrc.org

**ICRC Kismayo sub-delegation**
Fanole section near Qacle junction
opposite Sadam2 Building
Kismayo, Somalia
Email: Kis_kismayo@icrc.org

**ICRC Beledweyne sub-delegation**
Madina Wadi Sharey
Beledweyne Kshon Section
Iridda Aamin road
Wadi building
Beledweyne, Somalia
www.icrc.org


© ICRC, August 2019



facebook.com/icrc
twitter.com/icrc_Africa
www.instagram.com/icrc_afrique
https://blogs.icrc.org/somalia/


ICRC


2019.1089/402 08.2019 3000
Cover photo: Abdikarim Mohamed/ICRC


OO KOOBAN



# ICRC-da SOOMAALIYA

ICRC

ICRC waxay Soomaaliya ku leedahay taariikh dheer oo soo jirtay muddo ka badan 35 sano oo ay ka jawaab celinaysay colaadaha iyo gargaarka bani'aadamnimada. ICRC oo si dhow ula shaqeyneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya (SRCS) waxay sii wadi doontaa caawinta dadka iyo bulshada oo waxyeello isugu darsantay ka soo gaartay colaadaha hubaysan ee daba dheeraaday iyo musiibada cimilada oo soo noqnoqda. ICRC waxay sidoo kale ka shaqeysaa inay dib u xiriiriso xubnaha qoyska ee kala lumay, waxay booqataa xabsiyada, waxayna dooneysaa inay hubiso ixtiraamka sharciga caalamiga ee aadamnimada (IHL).

## DHOWRIDDA

Dhowridda shakhsiyaadka sida xun u saameeyeen dagaallada hubaysan - dadka rayidka ah, kuwa dhaawaca ah iyo bukaanada, shakhsiyaadka laga qaaday xorriyaddooda - oo ku qoran xeerka caalamiga. Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada (IHL) shuruudo oo doon doonaya in la xaddido saameynta colaadaha hubaysan. Xeerku wuxuu dhowraya dadka aan ka qayb qaadan ama aan ka qayb qaadi doonin colaadaha, wuxuuna xaddidaya aaladaha iyo qaababka hab-dhaqanka dagaalka. ICRC waxay ku dadaashaa in ay hubiso in kuwa ku lugta leh dagaalka ay u hoggaansamayaan waajibaadkooda ku xusan Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada. Hay'adda waxay dhammaan qaybaha ku lugta leh colaada si joogto ah u xusuusisaa



Abdikarim Mohamed/ICRC




waajibaadkooda si loo xaqiijiyo in dadka rayidka ah laga dhowro waxyeellada colaadaha, in kuwa dhaawaca ah iyo bukaankaba loo fidiyo daryeel, iyo in shakhsiyaadka laga qaaday xorriyadda loola dhaqmo si bani'aadamnimo ah.

ICRC waxay sanado badan ka shaqayneysay xabsiyada ku yaala Soomaaliya, ayadoo ku doodaysa in shakhsiyaadka xorriyadda laga qaaday loola dhaqmo si bani'aadamnimo ah oo aan si xun loo kala soocin iyadoo aan loo eeginin sababo la xiriira maxbuusnimadooda. Arrimahaan awgeed, waxaan si joogto ah wadahadallo ula yeelannaa mas'uuliyiinta xabsiyada si aan uga caawinno sidii ay xaaladda u hagaajin lahaayeen una siinno khibrad hab-shaqayn, iyo sidoo kale taageero qalab markii loo baahdo, gaar ahaan si aan u hubinno in biyo nadiif ah, daryeel caafimaad asaasi ah iyo cunno la daboolay.

Inta lagu guda jiro colaadaha, masiibooyinka iyo barakaca, qoysaska badanaa waa ay kala lumaan. Ayadoo loo maraayo barnaamijka Dib-u-soo Celinta Xiriirka Qoyska (RFL), ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan kuna dadaalaan sidii loo heli lahaa dadka la la'yahay isla markaana lala xiriiriyo eheladooda. Hawshaan waxaa ka mid ah raadinta xubnaha qoyska, dib-u-soo celinta xiriirkii ay la lahaayeen eheladooda, mararka qaarna dib-u-mideynta qoysaska iyo dadaalada lagu caddeynayo qaddarka ku dhacay kuwa wali maqan. Barnaamijka Dib-u-soo Celinta Xiriirka Qoyska wuxuu aruuriyaa fariimo la xiriira xubnaha qoyska wuxuuna u qaybiyaa ehelada kala jooga gudaha iyo dibadda Soomaaliya. Magacyada dadka la waayey ayaa sidoo kale laga baafiyaa BBC-da laanteeda afka Soomaaliga, waxaana lagu daabacaa websitka ICRC-da. ICRC waxay kaloo soo bandhigtay "Raad raaca Wajiga" oo loogu talagalay Soomaalida kuwaas oo lumiyey xiriirkii ay la lahaayeen eheladooda u haajaray Yurub. Raad raaca Wajiga wuxuu u suurtagelinaya in ay sawirka soo dhigaan meel gaar u ah oo loogu talagalay iyagoo rajaynaya in ehelkooda la waayey ama qof garanayo uu arki doono dibna ula xiriirin doonaan ayagoo u maraya Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

# CAAFIMAADKA

Helitaanka daryeelka caafimaadka asaasiga ah ayaa weli ah caqabad la xiriirta xaaladaha qalalaasaha hubaysan iyo colaadaha, barakac daba dheeraaday iyo cimilada qallafsan. Si gacan looga gaysto sidii wax looga qaban lahaa caqabaddaan, barnaamijyo kala duwan ayaa sameeyay iyada oo la eegayo horumarinta caafimaadka iyo samaqabka shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka. Iyada oo la kaashaneysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya (SRCS), ICRC waxay hadda waddaa gargaar degdeg ah, daryeel caafimaad asaasi ah (PHC), daryeel isbitaal (qaliin loo sameeyo dadka ku dhaawacma dagaalka, daryeel caafimaad degdeg ah iyo adeegyo kale) iyo barnaamijyo nafaqaynta. Waxay Ururka Bisha Cas ee Soomaaliya ku taageertaa in ay maamusho ku dhowaad 30 xarumo ee Daryeel Caafimaad Asaaasi ah oo bixiya adeegyo nafaqo oo loogu talagalay carruurta ka yar shanta sano, adeegyada dhalmada ka hor iyo dhalmada ka dib oo loo fidiyo haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya iyo sidoo kale adeegyada tallaalka carruurta ka yar shanta sano iyo haweenka uurka leh afar isbitaal (Keysaney, Madiina, Baydhabo iyo Kismaayo). Laba xarumo caafimaad (Radar iyo Dhusamareeb) ayaa waxay daryeel 24 saac ah siiyaanayaan hooyooyinka iyo kuwa dhowaan dhashay inta foosha socoto iyo foosha ka dib. ICRC waxay sidoo kale taageertaa 4 Isbitaal bulsho oo ku yaala Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya (Keysaney, Madiina, Baydhabo iyo Kismaayo) iyo sidoo kale socodsiinta labo ka mid ah xarumaha xanaanada deg degga ee ugu weyn koofurta iyo bartamaha Soomaaliya (Baydhabo iyo Kismaayo). Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee Soomaaliya ayaa wuxuu ka socdaa waddanka oo dhan, ujeedadiisu tahay in la siiyo tababaro, taageero iyo karti waxqabad kooxaha kala duwan iyo bulshooyinka. Iyada oo ay weheliso Ururka Bisha Cas, ICRC waxay ka shaqaysaa xoojinta awooda mutadawiciinta, xubnaha bulshada iyo gargaar bixiyeyaasha, iyagoo bixinaaya macluumaad, agabka ka jawaab-celinta iyo xirfadaha gargaarka deg degga ah si ay awood ugu yeeshaan inay si wax ku ool ah uga jawaab-celiyaan xaaladaha deg degga ah.







# SUGNAANTA DHAQAALAHA

Xaaladaha degdegga ee bani'aadamnimo oo daba dheeraaday iyo awoodda daciifka ah ee hay'adaha maxalliga ah si wax uga qabtaan baahiyaha jira ayaa waxaa ka dhalatay in qayb weyn oo ka mid ah dadweynaha ay awoodi waayeen in ay si joogto ah daboolaan baahiyahooda muhiimka ah. Si loo wanaajiyo isticmaalka cuntada iyo xaaladaha nololeedka inta lagu guda jiro xaaladaha degdegga ah, ICRC waxay bixisaa cunto iyo waxyaabaha muhiimka u ah qoyska. Si loo dhowro loona horumariyo hab-nololeedka, ICRC waxay sidoo kale hirgelisaa mashruucyo taageero nololeed ah sida qaybinta loorarka lagu shubo ciida oo loogu talagalay xakamaynta fatahaada webiyada, deeqo wax soo saar leh oo loogu talagalay beeraleyda, xoolo-dhaqatada, kalluumeysatada iyo kuwa dhaqda shinnida, iyo sidoo kale mashaariicda dhaqaalaha yar yar oo loogu talagalay in dakhli loogu abuuro qoysaska haweenka u soo saara nolol-maalmeedka. Iyadoo loo maraayo bixinta tababaro iyo qalabka beeraha si beeraleyda loogu caawiyo inay hagaajiyaan tacabka beeraha, ayaa ICRC waxay sidoo kale la shaqaysa Kooxda Farsamada Beeraha ee Soomaaliya (SATG). Mucaawinada waxaa loo bixiyaa qaab lacag caddaan ah, badeeco ahaan ama kaar ahaan. Intaa waxaa sii dheer, iyadoo loo maraayo barnaamijka Maareynta isku-dhafan ee Nafaqo-darrida Daran (IMAM) ayaa waxaan gacan ka geysanaa yareynta nafaqo-darrida iyadoo laga hortagaayo lana daweynaayo carruurta nafaqo-xumadu hayso ee ka yar 5 sano, haweenka uurka leh iyo kuwa nuujiya.

# BIYAHA

Sanado badan oo colaado ah iyo cimilo qallafsan sida abaarta iyo daadadka ayaa waxay carqaladeeyeen helitaanka iyo gaaridda biyo nadiif ah. Iyadoo hagaajinayso dayactirna ku sameynayso nidaamyada biyo bixinta, keydinta biyaha roobka iyo ceelasha ayaa ICRC waxay ka shaqeynaysa bixinta biyo nadiif ah. Waxay ICRC sidoo kale ka shaqeysaa hagaajinta kaabayaasha guud ee isbitaallada (Keysaney, Madiina iyo Kismaayo) iyo xaaladaha nololeed ee maxaabiista ku jira xabsiyada iyadoo kor loo qaadayo helitaanka biyaha, fayodhowrka iyo bixinta korontada. Si loogu hortago cudurada ka dhasha biyaha, ICRC waxay sidoo kale Ururka Bisha Cas ku taageertaa sidii kor loogu qaadi lahaa dhaqamada fayodhowrka ee ugu wanaagsan.

